

Sida Ilmuu U Bartaan Xirfadaha Bulshada

Fahanka sida carruurtu u bartaan habdhaqanka iyo barashada falcelintooda ku aadan bii'ada iyo dadka ku xeeran ayaa kaa caawin karta inaad ilmahaaga barto xirfadaha bulshada sida daryeelida, daacadnimada, wada shaqaynta, masuuliyada, iwm. Ilmaha yaryar ayaa wax ka barta dareenadooda. Waxay wax ku bartaan socodka, dhagaysiga, taabashada iyo dareemida. Daawashada, dhagaysiga, iyo fahmida cawaqaqib xumada ficiilada ayaa ka caawinaaya ilmaha inay fahmaan aduunyada ay joogaan. Ayagoo adeegsanaaya ku celinta dabeeecadooda, iyo falcelinta dadka kale ka baxshaan dabeeecadaas, waxay baranayaan waxyaabaha u suurageli kara.

Qaababka waxbarashada waxaa qayb ahaan go'aansha qoomiyada iyo dhaqanka ilmaha. Habdhaqanka ilmaha waa in lagu cabiraa qaab waafaqsan dhaqanka. Sidee ayaa ilmaha loogu edbiyaa guriga? Xanaaqa miyaa lasii dhiira geliyay sabab la xariirta in awood badan muhiimad la siiyo? Waa maxay yoolalka qoysku? Qoysku ma wuxuu muhiimad siiyaa habdhaqanka wax iska celin ah halkii uu adeegsan lahaa kala dhixgelid?

Erayga "barashada habdhaqanka bulshada" ayaa qeexaaya qaabab badan oo dadku u saameeyaan ayna u badelaan habdhaqanka dhixgeliid. Tusaale, Fatima oo sadex sano jir ah ayaa barata in haddii ay boonbale tuurto ayna ayadu isku tuurto dhulka si ay u muujiyo caro, ay heli doonto dareen. Adeeg bixiyaha ayaa haysta dookh ah inuu ka jawaabo, Waxay dhihi kartaa, "Soo qaado boonbalehaas. Waad ka roonaan kartaa sidaan". Ama waxay oran kartaa, "Markaad soo qaadato boonbalaha ayaan ku caawin doonaa," kadibna ay iska dhago tиро Fatima ilaa ay soo qaado. Qaabka saddexaad ee adeeg bixiyuhu ku jawaabi karto waa inay u tagto Fatima ayna kala hadasho dareennada una sheegto qaabab kale oo ay dareenadeeda u muujin karto. Adeeg bixiyaha ayaa siinaaya xoojin marka dabeeecada Fatima isbadesho. Dhammaan saddexda jawaabood ayaa siinaaya Fatima waxay rabto - taageerada qof wayn; laakiin jawaabta saddexaad, adeeg bixiyaha ayaa ka caawinaaya Fatima barashada qaabab sidaan ka fiican oo ay u maarayso dareenadeeda."

Maaraynta dabeeecadu waa hanaanka wax barista ee aasaasiga ah halkii laga xakamayn lahaa cilada. Tusaalaha kore:

- Adeeg bixiyaha ayaa aqoonsaday cilad (tuurista boonbalaha iyo muujinta caro).
- Adeeg bixiyaha ayaa u sheegaaya Fatima inay fahmayso dareenkeeda.
- Adeeg bixiyaha ayaa ka caawinaysa Fatima inay hesho qaabab kale oo ay u "xaliso" cilada.
- Adeeg bixiyaha ayaa ogaanaysa marka dabeeecada Fatima isbadesho.